




# VALG

## WARBIXIN

Af-soomaali | Somali

# Doorashada golaha degmada- iyo golaha gobolka ee 2015

Warbixin muhiim ah oo ku socota qofka codkiisa dhiibanaya



**Maalinta doorashadu waa 14-ka sibtember. Xusuuso inaad aqoonsi soo qaadato!**



Kommunal- og  
moderniseringsdepartementet

## Doorashada golaha degmada- iyo golaha gobolka ee 2015

Doorashadan waxaan ku dooranaynaa dadki nagu matali lahaa golaha degmada iyo golaha gobolka.

**Golaha degmadu** waa unugga ugu sarreeya degmada. Halkan ayaa lagu gaaraa go'aammada degaanka ee sida xannaanooyinka carruurta, maadinta carruurta, su'aalaha qorshaha- dhulka iyo boosaska, dugsiyada hoose/ dhexe, adeegyada caafimaadka- iyo daryeelka, hawlgallada dhaqanka iyo nadaafadda.

**Golaha gobolku** waa unugga ugu sarreeya golaha degmooyinka gobolka (fylkeskommunen). Golaha gobolka ayaa gaara go'aannada waxyaalaha ay ka midka yihiin waxbarashada dugsiyada sare, waddooyinka gobolka iyo marrinnada doomaha ee kuwaa ku xiran, gaadiidka dadweynaha ee gobolka iyo hawlgallada dhaqanka.

Oslo waxaa ka jira doorasho gole degmo iyo doorasho gole xaafadeed, ee kama jirto doorasho gole gobol.

20 degmo ayay 16 jirrada - iyo 17 jirradu ka qaybqaadan karaan doorashada golaha degmada. Kuwani waa degmooyinka Austevoll, Eid, Gausdal, Hamar, Horten, Hå, Klæbu, Kautokeino, Kristiansund, Lillesand, Luster, Mandal, Marker, Målselv, Namdalseid, Oppegård, Porsgrunn, Stavanger, Tysfjord iyo Vadsø.

Arrimaha meesha aad deggan tahay ayaa saamaynta ugu badan ku leh adiga nololmaalmeedkaaga. Haddaba marka aad codkaaga dhiibato, waxaad ka qaybqaadanaysaa go'aaminta cidda adiga iyo danahaaga kugu matalaysa golaha degmada iyo golaha gobolka.

Buuggan yar waxaa ku qoran warbixin ku saabsan sidaad wax u dooran lahayd.

### Maalinta doorashadu waa insiin 14-ka sibtember 2015

Degmooyin badan ayaa xataa axadda 13-ka sibtember doorasho qabta. Degmada ayaa sheegi doonta in ay doorashadu dhici doonto hal ama labo maalmood.

## **Xusuuso in aad aqoonsi soo qaadata marka aad codka dhiibanayso!**

Sharciga doorashadu wuxuu dhigayaa qofka codkiisa dhiibanaya ee kan codka ka qabanaya aanu aqoonnin inuu aqoonsi dhiibto. Waxaa tusaale ahaan aqoonsi noqon kara baasaboor, laysin baabuur ama kaar bangi oo sawir leh, laakiin nooc kale oo aqoonsi ahna waad isticmaali kartaa. Shuruudda aqoonsigu waa inay ku qoran yihiin qofka wax dooranaya magaciisa, taariikhda dhalasho iyo sawir.

Haddii aad ku jirto meel dadka lagu hayo sida guryaha dadka waaweyn, isbataal ama xabsi, waxaa aqoonsigaaga caddayn kara qof ka shaqeeya meesha aad ku jirto.

## **Dhammaan dadka wax dooranaya waxaa loo diraa kaarka doorashada**

Kaarka doorashada waxaa dusha uga qoran golaha doorashada ee aad ka diiwaangashan tahay iyo wakhtiyada uu golahaasi furan yahay maalinta doorashada. Kaar doorasho uma baahnid si aad codkaaga u dhiibato, laakiin saas ayaa kuu dhakhso badan. Kaarka doorashadu ma aha aqoonsi.

## **Yaa codkiisa dhiiban kara?**

- Dadka haysta dhalashada Norway ee 18 sano buuxinaya sanadka 2015 gudihiisa kuwaas oo ay u diiwaangashan tahay inay deggen yihiin ama deggena jireen Norway.
- Dadka haysta dhalashada dalalka kale ee waqooyiga ee 18 sano buuxinaya sanadka 2015 gudihiisa, kuwaas oo ay u diiwaangashan tahay inay Norway deggenaayeen ugu danbayn 30-kii juun 2015.
- Dadka haysta dhalashada dalal kale ee 18 sano buuxinaya sanadka 2015 gudihiisa, kuwaas oo ay u diiwaangashan tahay inay Norway si xiriir ah u deggenaayeen saddexdii sano ee u danbeeyay maalinta adoorashada horteed.
- 20 degmo ayay kuwa buuxinaya 16 sano sanadka 2015-ka gudihiisa codkooda dhiiban karaan doorashada golaha degmada. Iyaguna waa in ay buuxiyaan shuruudaha sare ku qoran. Bogga 2-aad ka eeg degmooyinka ay arrintani khuseyso.

## Goortee iyo xaggee ayaad codkaaga ku dhiibanaysaa?

**Maalinta doorashada** waa in aad codkaaga ka dhiibataa degmada aad ka diiwaangashanayd in aad deggan tahay 30-ka juun 2015. Goob kasta oo ka mid ah goobaha doorashada ee degmada ayaadna codkaaga ka dhiiban kartaa.

**In aad codkaaga horey u sii dhiibato** waxaad samayn kartaa laga billaabo 1-da luuliyo ilaa iyo 11-ka sibtembar adiga oo codkaaga ka dhiiban kara degmadii aad doonto. Eeg sawirrada bogga midkan ku xiga ee tusaya sida aad codkaaga uga dhiibanayso degmada aad deggan tahay.

**Haddii aad codkaaga ku dhiibanayso meel ka baxsan degmada aad deggan tahay**, habka codka loo dhiibanayo markaas wuu is yara beddelayaa. Markaas waxaa lagu siinayaa kaar cod-bixin oo ay ku qoran yihiin magacyada xisbiyada siyaasadeed ee diiwaangashan, laakiin aanu ku qornayn magac musharrax. Waa in aad istillaab saartaa ama ku qortaa xisbiga/kooxda aad doonayso in aad u codeyso. Haddii aad doonto waxaad kaar cod-bixin kala imaan kartaa degmada aad deggan tahay oo kaas ayaad isticmaali kartaa haddii aad doonayso in aad musharrax siiso codad qofeed. Waa isla sidaas oo kale haddii aad doorashada golaha gobolka aad codka ku dhiibanayso meel gobolkaaga ka baxsan. Haddii aad codka ku dhiibanayo meel ka baxsan degmadaada, waa in uu hawlwadeen doorasho kuu tiimbareeyo kaararka codbixinta ka hor intaadan ku ridin bokhshadda cod-bixinta. Bokhshaddaan iyo kaarka doorashada ayaa bokhshad kale lagu sii duubayaa, dabadeedna waxaa lagu ridayaa santuukha codka. Codkaaga waxaa loo dirayaa degmadaadi si loo tiriyo.


Haddii aad jirran tahay ama aad hawlgab tahay, waxaad degmada ka codsan kartaa in aad codkaaga guriga horey ugu sii dhiibato. Degmada ayuu kuu sheegaysa wakhtiga codsiga ee kama-danbaysta ah.

Degmada ayaa kuu sheegeysa meelaha ay goobaha doorashadu ku yaallaan iyo wakhtiyada ay furan yihiin.


Laga billaabo bisha ogoosto  
waxaad goobtaada doorashada  
ka arki kartaa telefoonka gacanta:  
[www.valglokaler.no](http://www.valglokaler.no)




## Sidee ayaad codka uga dhiibanaysaa degmadaada?




1) Soo qaado kaarka cod-bixinta ee aad isticmaalayso: mid doorashada golaha degmada (kommunestyre) midna waa doorashada golaha gobolka (fylkesting).




2) Wixii aad doonayso ka beddel kaararka cod-bixinta (hagista ka eeg bogga midkan xiga).



3) Isku laab mid kasta oo kaararka cod-bixinta ka mid ah oo magaca xisbigu gudaha ha jiro, barta tiimbaruhuna kor ha soo jirto – markaa lama arki karo cidda aad u codeysay. Bokhshad iyo wax kale midna la gelin maayo kaararka cod-bixinta.



4) U tag hawlwadeennada doorashada oo tiimbare ha lagu dhufto dusha sare ee kaararka cod-bixinta. Labada kaar ee cod-bixinta waa in uu labadaba tiimbare saarnaadaa si loo aqballo!




5) Kaararka doorashada ee la tiimbareeyay ku rid santuukha doorashada.

## Sidee ayaad u beddelaysaa kaarka cod-bixinta?

Haddii aad dooneysid in aad wax ka beddeshid musharraxiinta la dooranayo, waa in aad cod-qofeed (personstemme) siisaa musharraxiintaas iyaga ah. Adiga ayaa xor u ah in aad beddesho kaarka cod-bixinta oo aad bixiso cod-qofeed.


Ha ka baqin in aad wax beddesho. Habka aad wax u beddeleyso wuxuu ku qoran yahay kaarka cod-bixinta. Codkaaga la tuuri maayo inkasta oo aad khalad samayso!

### Sidaan ayaad cod-qofeed u bixin kartaa:




#### Doorashada golaha dagmada:

1) Istillaab saar goobaabinta (ruten) ku dhinac taal magaca musharraxa aad u codaynayso. Intii musharrax ee aad doonto ayaad cod-qofeed siin kartaa.



2) Magaca musharraxa xisbiyada/kooxaha kale ku qor meesha gaarka ah ee loogu talo galay ee kaarka cod-bixinta. Inta magac ee musharrax ee aad qori karto waxay ku caddahay warqadda cod-bixinta.

Ogoow in haddii aad cod-qofeed siiso musharrax ka socda xisbi/koox kale, wax loogu yeero codka liiska (listestemme) ayaa loo wareejinayaa xisbigaas/kooxdaas kale.



#### Doorashada golaha gobolka:

Istillaab saar goobaabinta (ruten) ku dhinac taalla magaca musharraxa aad dooneyso inaad u codeyso. Intii musharrax oo aad doonto ayaad cod-qofeed siin kartaa.

## Yaa la dooranayaa?

Guddiga doorashadu wuxuu marka hore ogaanayaa inta matale ee ay xisbiyada ama kooxaha kala duwan ku yeelanayaan golaha degmada ama golaha degaanka gobolka. Markaas kaddib ayuu guddiga doorashadu tirinayaa cod-qofeedka si loo ogaado musharxiinta laga soo dooranayo xisbi ama koox walba.

**Warbixin intan ka badan waxaad ka helaysaa**  
**[www.valg.no](http://www.valg.no)**



Waxaa 2015 soo saaray Wasaaradda degmooyinka- iyo casriyaynta  
Daabacaaddan waxaa sidoo kale lagu diyaariyay nynorsk, af-saamiga iyo toban luuqadood oo qalaad

Warbixin intan ka badan oo doorashada ku saabsan ka eeg [www.valg.no](http://www.valg.no)

Lambarka daabacaadda: H-2344 Af-soomaali | Somali